

## Caawino-sharciyeed ku saabsan kiisaska muwaadinimada (statsborgerskap)

### Kiisaska ay NOAS qiimeyso

NOAS waxay siisaa oo keliya talooyin iyo caawino dhanka sharciyada ah qaxootiyada ay Norway kasoo qaadatay xeryaha qaxootiyada ee ay maamusho UNHCR (overføringsflyktning), ama ruuxu uu yahay mid megengelyo ka dalbaday Norway gudaheeda, sidaana kaga hellay Norway ogolaansho-sharci.

### Usoo dir kiiskaaga NOAS

Hadii aad doonayso in NOAS ay eegto kiiskaaga, waa in aad soo dirtaa waraaqda- ogolaansho-siinta ah oo saxiixan (fullmakt), iyo koobiyada dokumintiyada khuseeya kiiskaaga.

Dokumentiyada aad soo direyso hadii aad doonayso in NOAS ay eegto ama qiimeyso kiiskaaga :

- Waraaqda-ogolaansho-siinta oo saxiixan
- Dokumenti ah go'aankii aad sharciga ku heshey (qaxootinimo ama mid bini'aadnimo uu asal u yahay).
- Iyo diidmada aad ka heshey codsiga muwaadinimada (statsborgerskap).

Hadii aad dokumentiyo kalle ama macluumaad/warar aad isleedahay waa u mihiim kiiska aad hayso, waad noo soo diri kartaa.

Waraaqda-ogolaansho-siinta NOAS iyada oo norweeji ama ingiriis (PDF) ah waxaad ka heleysaa ([riix halkan](#)). Waxaad inoogu soo diri kartaa dokumentiyadaada hadba midkaad doonto, Boosto ama e-mail. E-mail ([riix halkan](#)) . Cinwaanka bostada: NOAS, Torggata 22, 0183 Oslo

### Waqtiga ay qaadanayso qiimeynta kiiskaaga

Kiiskaaga sida ugu dhaqsiiyaha baddan oo aan awood ugu helno ayaan u fiirin doonaa.

Sababo la xiriira xadidnaan awoodeed, waxay inta baddan qaadanaysaa bilo ka hor inta aynaan eegin kiiskaaga. NOAS waxay inta baddan isku taxulujisaa qiime-gaar ah siinta kiisaska ubaahan in deg-deg wax looga qabto. Balse hubanti uma haysano in kiiskaaga aan qaadan doono oo aan wax kasii qaban doono.

### NOAS' qiimeynta kiiskaaga

NOAS way qiimeysaa dhamaan kiisaska u yimaada. Qiime gaara waxaan siinaa oo aan ka shaqaynaa, kiisaska inoola muuqda in ay haystaan sababo macquula oo wax ka bedeli kara go'aanka diidmada.

Marka aan kiis qiimeyneyno, waxa aan culeyska saarnaa:

- Inta ay le'egtahay caawinada aad ka heshey meelaha kalle.
- In ay jiraan warar cusub oo muhiim u ah kiiskaaga, wararkaasoo UDI ama UNE aysan horey u qiimeyn, sidoo kallena ka dhigi karta jawaabta dawcada mid ka duwan tii markii hore la hellay.

Hadii ay inoola muuqato in aynaan wax ka bedeli karrin diidmadii uu horey u hellay kiiskaagu, waxaan kuu soo diri doonaa fariin arintaa ku saabsan, waana lagu sharixi doonaa sababta.